Baro Omakanta

– hagaha muwaadiniinta

Kanta

Omakanta waxaad ka arkeysaa macluumaadkaada caafimaadka

Waxaad ka dhex arki kartaa macluumaadkaaga caafimaadka keydka macluumaadka shaqsiyeed, marka aad ganacsi ku leedahay daryeelka caafimaadka guud ama kuwa gaarka loo leeyahay ama farmashiyaha, macluumaadka ku saabsan booqashadaada waxaa lagu kaydinayaa adeegyada Kanta.

Si aad u aqriso macluumaadkaaga caafimaadka waxaad u baahan tahay inaad gasho Omakanta, Tusaale ahaan, waad arki kartaa daawooyinka laguu qoray ee adiga laguu qoray iyo diiwaanka uu sameeyay dhakhtarku, yacni macluumaadka booqashada. Mustaqbalka, macluumaadka ku saabsan adeegyada bulshada ayaa sidoo kale ka soo muuqan doona Omakanta. Adeegyada bulshada waxaa ka mid ah tusaale ahaan adeegyada naafada iyo adeegyada guryaha.

Haddii aad ogolaasho bixiso, dhammaan xirfadleyda ku daryeelaya waxay arki doonaan macluumaadka kugu saabsan ee lagu kaydiyay macluumaadka. Ruqsad siinta waxay sahlaysaa shaqada xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka.

Tilmaamahan wuxuu kuu sheegayaa macluumaadka aad ka heli karto Omakanta. Tilmaamuhu wuxuu kaloo kuu sheegayaa macluumaadka lagaa muujinaayo adiga xirfadleyda isticmaala Kanta iyo sida aad saameyn ugu yeelan karto.

Soogalinta Omakanta

Waad isticmaali kartaa Omakanta haddii aad haysato lambar aqoonsi oo Finnish ah iyo mid ka mid ah hababka soo socda ee lagu aqoonsan karo:

- aqoonsiyada bangiyo ee internetka
- shahaadada moobiilka
- kaarka aqoonsiga qafis.

Saan ayaad u galeysaa Omakanta

1. Aad ciwaanka **kanta.fi**
2. Dhagsii badhanka ku yaal geeska midig ee kore ee bogga **Soo gal Omakanta (Kirjaudu Omakantaan)**.
3. Dalbo sida laguugu aqoonsanaayo

Aqoonsiga kidib waxaad aadeysa bogga ugu horeeyo ee Omakanta.

Sideen oga faaideysankaraa Omakanta?

Omakanta waad ka eegi kartaa

- daawooyinka laguu qoray waxaadna codsan kartaa cusbooneysiintooda daawoda
- macluumaadka la xiriira caafimaadkaaga iyo daryeelkaaga, sida natiijooyinka shaybaarka iyo baaritaanka cudurka
- waxaad ka sameyn kartaa ujeedo ah inaad ku tabarucdo xubnaha markii aad dhimatit
- inaad fiiriso macluumaadka ilmo yar, taas oo ah, cunug da'diisu ka yar tahay 18 sano iyo
- inaad ka fiiriisid adigoo metelaya qof kale oo qaangaar ah, haddii aad awood u leedahay ama aad fasax u leedahay inaad sidaas sameyso.

Kaydinta macluumaadka Kanta waxay faa'iido u tahay adiga iyo xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka. Nabdoonaanta daaweyntaadu way fiicnaan doontaa marka macluumaadkaaga caafimaad ay hal meel ku yaalliin. Kanta wuxuu u oggolaanayaa xirfadlayaasha inay ku daaweeyaan si ay u arkaan daawooyinka laguu qoray iyo natiijooyinka baaritaankaaga. Uma baahnid inaad sameyso cilmi baaris isku mid ah marar badan, taas oo kuu badbaadinaysa waqti iyo lacag.

Macluumaadkaaga si aamin ah ayaa loogu kaydin doonaa

Adeegyada Kanta arimahaada caafimaadka waa amiin. Macluumaadkaaga caafimaadka waxaa arki kara oo keliya xirfadleyda aad la macaamisho ama ku daweyso. Macluumaadkaaga waxaa loo xafidi doonaa si qarsoodi ah loomana gudbin doono ogolaanshahaaga la'aantii.

Haddii aad rabto, waxaad bixin kartaa oggolaanshaha wareejinta xogtaada ee u dhexeysa hay'adaha daryeelka caafimaadka ee kala duwan. Kadib xirfadlaha ku daryeelaya wuxuu sidoo kale arki doonaa macluumaadka daryeelka ee laga duubay meelo kale oo Kanta ah. Kuwani waxay noqon karaan, tusaale ahaan, gelitaanno ay sameeyeen daryeelka caafimaad ee degmo kale ama daryeel caafimaad oo gaar loo leeyahay. Waad mamnuuci kartaa bixinta macluumaadkaaga caafimaad inta udhaxeysa ururada, gebi ahaan ama qayb ahaan. Tusaale ahaan, waad diidi kartaa shaacinta xogta booqasho gaar ah.

Cunugga arimahiisa markaad ka fiirineysid Omakanta

Mas'uulka wuxuu ku arkaa Omakanta macluumaadka caafimaadka canugga kayar 10 sano jir.

Mas'uulka ayaa sidoo kale arka xogta carruurta da'doodu tahay 11-17 marka isbedel lagu sameeyay nidaamyada macluumaadka ee daryeelkooda caafimaad.

Xirfadlaha daryeel-caafimaadeedka wuxuu qiimeeyaa in ilmaha yar, yacni ka yar yahay 18 sano, uu go'aan ka gaari karo daryeelkiisa ama ayada. Qofka dhalinyarada ah ee go aan qaadashada leh ayaa xor u ah inuu doorto in macluumaadkiisa ama ayada ay u muuqan karaan ilaaliyaha Omakanta. Haddii qofka dhallinta yar uusan kaligiis go'aan ka gaari karin daaweyntiisa, ilaaliyaha ayaa sidoo kale arki doona faahfaahinta booqashada.

Qof kale oo weyn arimahiisa markii aad fiirineysid

Waxaad sidoo kale isticmaali kartaa Omakanta adiga oo ka wakiil ah qof kale oo weyn. Macaamiisha waxaad u baahan tahay ruqsad Suomi.fi. Ogolaanshaha waxaa la dahaa "*Terveydenhuollon asioiden hoito*". Isla markii waxaad meesha ka codsan kartaa qof kale oo weyn arimahiisa intaa galikartit adiga oo qadka tooska isticmaaleysid. Ogolaanshaha waxaad ku sameyn kartaa **Suomi.fi**. Tusaale ahaan, waayeel ama qof jirran ayaa ka faa'iideysan kara qof daryeela waxyaabaha isaga ama iyada markii Omakanta la'isticmaalaayo.

Tusaale ahaan, adiga oo ka wakiil ah qof kale oo qaangaar ah

- waxaad ka weydiin kartaa inaad cusbooneysiiso rijeeto
- waxaad u fiirinkartaa qofkaas natiijooyinka baaritaanka shaybaarka
- waxaad fiirin kartaa macluumaadka ku saabsan booqashada daryeelka caafimaadka.

Meeshee ka helaayaa macluumaad dheeraad ah?

- **kanta.fi**
- xirfadlayaasha daryeelka caafimaadka iyo farmashiyaasha

Nala soco

Facebook: **Kantapalvelut**

Twitter: **@Kantapalvelut**

Kanta

Kela ayaa masuul ka ah adeegga Kanta. Kelada ayaa horumarisa adeegyada Kanta Waaxda Caafimaadka iyo Daryeelka iyo Wasaaradda Arimaha Bulshada iyo Caafimaadka.